# MIISAANIYADDA KA QAYBQAADASHADA MAGAALADA BOSTON

## *QORAALAHA FULINTA OO KOOBAN*

# DRAFT

## WAA MAXAY MIISAANIYAD KA QAYBQAADASHO?

Miisaaniyad ka qaybqaadashada (MQ) waa hab dimuqraadi ah oo xubnaha bulshadu ay si toos ah u go'aansadaan sida loo isticmaalo qayb ka mid ah miisaaniyada dadweynaha. Miisaaniyad ka qaybqaadashadu waa hab-dhaqan sii qoto dheereeya dimuqraadiyadda, dhista bulshooyin xoog badan, abuurna qaybsiga hantida dadweynaha si siman. Dhawr magaalo oo ku yaal Maraykanka, oo ay ku jiraan New York, Chicago, Durham, Cambridge, iyo Somerville, ayaa qaatay oo hirgeliyey hababka MQ si loo kordhiyo ka-qaybgalka bulshada iyo miisaaniyadda ee dadka deggan dhexdooda.

## MIISAANIYADA KA QAYBQAADASHADA EE BOSTON

Xafiiska Miisaaniyada Ka Qaybqaadashada (XMQ) waxa lagu aasaasay Xeerka Gu'gii 2023. Hadafka xafiisku waa inuu bixiyo barta rasmiga ah ee laga soo galo dadka degan Boston si ay gacan uga geystaan habka miisaaniyada Magaalada. Iyadoo loo marayo wareegyada MQ-ga ee sannadlaha ah, xafiisku wuxuu hawlgelin doonaa dadweynaha wuxuuna sare u qaadi doonaa mashaariicda bulshada udub dhexaad u ah ee horumarinta sinnaanta bulshada iyo jinsiyadda.

MQ Wareega koowad, reer Boston waxay door firfircoon ka qaadan doonaan aqoonsiga, qaabaynta, iyo kala hormarinta fikradaha mashruuca si wax looga qabto baahiyaha deegaanka iyagoo gacan ka geysanaya ogaysiinta miisaaniyad sanadeedka Magaalada. Deganayaashu waxay si wada jir ah ula shaqayn doonaan Xafiiska Miisaaniyada ka qaybqaadashada, Guddigeeda Kormeerka Dibadda, Waaxyaha Magaalada ee ay khusayso, iyo ururada bulshada si ay u caawiyaan go'aaminta u-qalmitaanka iyo suurtogalnimada fikradaha mashruuca ee bulshadu bilawday.

Sannadkan tijaabada ah ee ugu horreeya, XMQ iyo Guddigeedu waxay abuureen "Buugga Xeer-dejinta Miisaaniyadda ka qaybqaadashada" si ay u bixiyaan qaab-dhismeed dhammaystiran iyo jaangooyooyin nidaamyo iyo hawlgallo loogu talagalay hindisahan cusub ee Boston.

## JAANTUSKA 1: WAKHTIGA HABKA PB IYO TAARIIKHAHA



# GOORMA IYO SIDA LOOGA QAYB QAATO HABKA PB

**URURINTA FIKRADAHA**
*(Jul. 2024)*

Dadka degan Boston waxay yeelan doonaan wadooyin badan oo ay fikradahooda mashruuca kula wadaagaan Xafiiska Miisaaniyada ka qaybqaadashada. Bisha Luulyo, xafiisku wuxuu bilaabi doonaa ololе ururin fikradeed oo magaalada oo dhan ah oo ay heli karaan dhammaan dadka deggan Boston. Fikradaha waxaa lagu soo gudbin karaa khadka internetka ee PB Portal, khadka taleefanka MQ, shaqsi ahaan laamaha Maktabada Dadweynaha iyo Hoolka Magaalada, iyo munaasabadaha la qabto iyadoo lala kaashanayo ururada bulshada.

*Iyada oo ku saleysan natiijooyinka wejigan bilowga ah, XMQ waxay qiimeyn doontaa oo ay aqoonsan doontaa 15-ka ugu sarreeya Mudnaanta Bulshada iyadoo lagu saleynayo nooca iyo tirada fikradaha la midka ah ee ay soo gudbiyeen dadka deggan magaalada oo dhan.*

### *U-qalmitaanka Mashruuca iyo Shuruudaha*

Habka PB waxa uu mudnaan siinayaa fikradaha mashruuca ee dhisa awoodda wadareed ee arrimaha caddaaladda bulshada iyo jinsiyadda. Fikradaha mashruuca waxaa soo gudbin kara dadka degan Magaalada Boston, iyadoon loo eegin da'da, waana inay buuxiyaan shuruudahan soo socda:

- Mashruucyadu waxay ku kooban yihiin kharash hal mar ah, mana abuuraan jagooyin joogto ah oo cusub;
- Soo jeedinta mashruuca waxaa ku jiri kara barnaamijyo iyo adeegyo, iyo sidoo kale kaabayaasha jirka; horumarinta tignoolajiyada, iyo horumarinta bulshada ee hantida guud ee ay magaaladu leedahay.
    - Mashaariicda kaabayaasha dhaqaalaha ee gaarka ah, gobolka, ama hantida federaalka uma qalmaan, sida mashaariicda khuseeya Waaxda Ilaalinta & Madadaalada (WIM) ama Maamulka Gaadiidka ee Massachusetts Bay (MGMB).
    - Fikradaha mashruuca ee la xidhiidha barnaamijyada iyo adeegyada xarumaha aan magaaladu leedahay waa u qalmaan.
- Fikradaha mashruucu waa in ay noqdaan kuwo la hirgalin karo, oo waafaqayaan siyaasadaha, sharciyada, xeerarka, iyo Xeerka Miisaaniyada ka qaybqaadashada ee Magaalada; iyo
- Mashaariicda waa in ay fulisaa ama maamusho Waaxda Magaalada ama wakaalada ku haboon ee helaysa qoondaynta miisaaniyada tooska ah.

***Tusaalooyinka Fikradaha U Qalma:*** Barnaamijyada lagu xoojinayo caafimaadka maskaxda ee dhalinyarada Boston; Kordhi shabakada WiFi bilaashka ah ee Magaalada si aad u gaadho meelaha dakhligoodu hooseeyo; Fasalada akhris-qoraalka dhijitaalka ah ee muwaadiniinta waayeelka ah si ay u bartaan xirfado cusub oo ay kor ugu qaadaan xidhiidhada bulshada; Kobcinta goobaha dadweynaha iyada oo loo marayo mashaariicda kaabayaasha (farshaxanka dadweynaha, geedaha waddooyinka, kuraasta, iwm.)

***Tusaalooyinka Fikradaha Aan U Qalmin:*** Bixinta mushaharka shaqaalaha dawladda si uu u bixiyo adeegyada; Dayactirka dhismo gaar loo leeyahay; Caawinta hay'adda inay dib u cusboonaysiiso meel ay ka kiraynayso mulkiilaha gaarka ah; Caawinta machad diimeed hagaajinta meesheeda; Kordhi inta jeer ee basaska ama tareenada MGMB

## GOLYASHA ARAGTIDA IYO KA-QAYBGALKA INTERNETKA
*(Okt. - Nov. 2024)*

Madasha Aragtida, deganayaashu waxay la falgali doonaan Waaxyaha Magaalada ee ay khusayso si ay dib u eegis ugu sameeyaan, uga doodaan, una qiimeeyaan suurtogalnimada iyo saamaynta fikradaha lagu hoos keenay mudnaanta bulshada. Habkan, dadweynuhu waxay gacan ka geysan doonaan aqoonsiga liis gaaban oo fikrado ah sida ugu wanaagsan ee wax looga qabanayo mudnaanta bulsho kasta. Deganayaashu waxay sidoo kale awoodi doonaan inay ku bixiyaan talooyinka horumarinta soo jeedinta codbixinta onlayn.

***XMQ iyo Guddiga Kormeerka Dibeda ayaa diyaarin doona 15 soo jeedin oo codbixin ah oo ku saleysan jawaab celinta dadka deegaanka iyo tilmaamaha sinnaanta. Xafiiska iyo waaxyaha magaalada ee ay khusayso ayaa samayn doona qiimaynta ugu danbeysa ee suurtogalka ah waxayna go'aamin doonaan kharashaadka la qiyaasay ee soo jeedinta codbixinta kasta.***

## CODEYNTA, MAALGELINTA MASHRUUCA, IYO HIRGELINTA
*(Jan. - Feb. 2025)*

Codbixinta soo jeedinta miisaaniyad ka qaybqaadashada waxay ka dhici doontaa qof ahaan iyo online. Warqadda codbixinta ee MQ, dadka deggan Boston ee da'doodu tahay 11 jir (ama fasalka 6aad) iyo ka weyn waxay awoodi doonaan inay doortaan ilaa shan (5) oo ah 15 soo jeedin, mid kasta oo leh qaddar dollar lagu qiyaasay. Soo jeedinta codadka ugu badan waa la bixin doonaa, ilaa xadka maalgelinta ee Wareegga MQ ee gaarka ah. Magaalada iyo XMQ waxay ku dhawaaqi doonaan soo jeedinta guusha leh natiijada codbixinta ee ugu dambeysa. Fulinta mashaariicda waxa la socon doona XMQ iyo waaxyaha magaalada ee ay khusayso.

## LA XIDHIIDH XAFIISKA  MIISAANIYADA KA QAYBQAADASHADA

Raadinta siyaabo aad uga qaybgasho? Fadlan la xidhiidh Xafiiska Miisaaniyadda ka qaybqaadashada!

Mareegta: www.boston.gov/participate

Iimaylka: pb@boston.gov

